



Warbixinta

Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 32^{aad}

(From 05 November 2016 to 03 January 2017)

March 2017

[Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 32^{aad}](#)

Ku:- Mudanayaasha Golaha Wakiilada JSL.

Ujeedo: - Warbixinta Shir-gudoonka ee kal-fadhigii 32^{aad}

Mudanayaal

Si aynu u gudano hawlaha inoo qorshaysan **kal-fadhiga 33^{aad}** ee iminka aynu galnay isla markaana aynu dardar galino, una dhameystirno hawlahii inaga baaqdey kal-fadhigii hore inagoo gudanyna Waajibaadkeena Qaran, waxaan halka idiinku soo gudbinaynaa waxqabadkii Golaha Wakiilada ee kal-fadhigii 32^{aad} oo dhamaystiran si aad u xasuusataan waxyaabihii inoo qabsomay iyo wixii aan inoo qabsomin.

Ajandihii Kal-fadhigii 32^{aad}

Ajandaha Kalfadhiga 33^{aad} ee Golaha Wakiilada.

06/03/2017

1. Warbixinta Shirgudoonka, Guddida Joogtada ah iyo Gudiyadda Golaha Wakiilada
2. Xogogaal u noqoshada Xalada Abaraha iyo Sixirbararka .
3. Mashaariicda Sharci ee Golaha Horyaal.

No.	Magaca Xeerka	Marxalada aa u marayo	Cida Gacanta ku haysa
1.	Xeerka Sahaminta Shidaalka iyo Soo saaristiisa	Akhiska 1 ^{aad}	Gole Waynaha
2.	Xeerka Dakhliga Shidaalka	Arkhiska 1 ^{aad}	Gole Waynaha
3.-.	Xeerka Macadanta Somaliland	Arkhiska 1 ^{aad}	Gole Waynaha
4.	Xeerka Maydhiista Lacagaha	Codayn	Gole Waynaha
5.	Xeerka Guud ee illalinta Degaanka (National Environment Law)	Akhriska 1 ^{aad}	Gudidda Khayrada iyo Degaanka
6.	Xisaab –Xidhka Miisaaniyada Dawladda 2014	Arkhiska 1 ^{aad}	Gud. Illanita Hantida Qaranka
7.	Xeerka Somaliland Road Authority	Akhriska 1 ^{aad}	Gudidda Gaadiidka iyo Wadooyinka
8.	Xeerka Ganansiga Baananka	Codayn	Gole Waymaha
9.	Xeerarka ka soo noqoday Madaxweynaha :- 1. Xeerka Booliska 2. Xeerka Xabsiyada	Codayn	Maamulka Golaha

	3. Xeerka Duulista Hawada 4. Xeerka Law Reform Commission.		
10.	Kaab Miisaaniyadeed 2017	Akhiska 1aad	Gud.Dhaqaalaha
11.	Xeerka Shirkadaha (Company law)	Akhiska 1 ^{aad}	Gud.dhaqaalaha
12.	Xeerka Xawaladaha	Akhiska 1 ^{aad}	Gud.Dhaqaalaha

4. Uyeedhista Masuuliyiinta Qaranka
5. Ansixinta Masuuliyiinta Qaranka
6. Xeerarka Golaha Guurtida ka soo noqda
7. Xeerarka Madaxweynaha ka soo noqda ee aanu saxeexin.
8. Iyo Wixii kale ee soo kordha

Kal-fadhigii 31^{aad}

No	Kal-fadhiga	Taariikhda uu furmay	Taariikhda uu xidhmay
1.	31 ^{aad}	05/11/2016	03/01/2017

Kal-fadhigii 33aad oo Goluhu qabtey hawlo aad muhiima oo ay ka mid ahaayeen Masuuliyiin Qaran oo kala duwan, Ansixinta Mashaariic sharci iyo ansixintii Heshiiskii Somaliland iyo Dalka Imaaraadka Carabta ee Saldhiga Militari ee Magaalada Berbera iyo sidoo kale Wax qabadkii Gudiyada Golaha, halkan ayaanu ku soo bandhigeynaa Wax qabadkii Kal-fadhiga 32^{aad} oo dhameysitiran si aynu u dardargalino kal-fadhiga 33^{aad}.

Warbixinada Golaha laga hor akhriyay:-

<u>Taariikhda</u>	<u>Warbixinta</u>	<u>cid akhridey</u>
12/11/2016	Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 31 ^{aad}	Xoghayaha Guud Mr. C/risaaq Siciid Ayaanle
12/11/2016	Warbixintii Gudidda Joogtada iyo Anshaxa	Md. Axmed Ducaale
26/12/2016	Warbixinta Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2017ka	Wasiirka Maaliyada Marwo. Zamzam Cabdi Adam

Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 32^{aad}

31/12/2016	Warbixinta Gudidda Dhaqaalaha iyo Maaliyada ee Odoroska Miisaaniyada Qaranka sanadka 2017ka	Md. Cumar Axmed Saleebaan Gudoomiyaha Gudidda Dhaqaalaha
------------	---	--

Xeerarkii Ansixiyay ee Madaxweynuhu Dhaqangaliyay:-

No	Mashruuc Sharciga la Ansixiyay	Taariikhda	Halka loo gudbiyay
1.	Xeerka Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka	13/12/2016	Maxweynaha
2.	Xeerka Maamulka iyo Maareynta Maaliyada	13/12/2016	Maxweynaha
3.	Oodoroska Miisaaniyada Qaranka 2017ka	02/01/2017	Maxweynaha
4.	Wax ka badalka iyo Kaabista Xeerka Doorashooyinka Madax/tooyada iyo Golayaasha Deegaanka.	16/01/2017	Maxweynaha

Ansixintii Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2017ka:-

Intii lagu jirey Kal-fadhigii 32^{aad} Waxay Wasaarada Maaliyadu Golaha Wakiilada u soo gudbisey Odoroska Miisaaniyad Qaranka ee Sanadkan 2017ka, iyadoo 26/12/2016 Wasiirka Maaliyada Marwo. Zamzam Cabdi Aadam oo ay weheliyaan Wasiir ku-xigeenka Wasaaradaas Md. Cali iyo Sarakhiisha Xafiiska Miisaaniyada ee Wasaarada Maaliyada ay Warbixin Golaha ka siiyeen Miisaaniyadaas 2017ka.



Ka dib markii Miisaaniyada ay Wasaaradu Warbixintaas Golaha ka siisay waxaa sida hanaanku yahey lagu wareejiyay Gudidda Dhaqaalaha si ay u soo baadhaan Miisaaniyada isla markaana Golaha Warbixin ka soo siiyaan, intaa ka dib, Gudiddu ka dib markii ay kulamo la yeelatay cidkasta oo ay khusesay Miisaaniyadu iyo cidii tabasha ka qabtey kana soo xogwareysteen Masuuliyiinta Wasaarada Maaliyada, sidoo kale ay kormeero kala duwan ku tageen Goobaha dakhliga dalka, Waxay Gudidda Dhaqaaluhu Warbixin ka siiyeen Golaha Miisaaniyadaas **31/12/2016** Warbixintaas oo uu Golaha ka horjeediyay Gudoomiyaha Gudiddaas Md. Cumar Axmed Saleeban (Sanweyne).

Wuxuuna Goluhu 02 January 2017kii Cod aqlabiyada ku ansixiyay Miisaaniyada iyadoon laga doodin ka dibn markii badiba Mudanayaashu soo jeediyeen in sidaas lagu ansixiyo Miisaaniyada, fadhigaas oo ay Golaha ka soo xaadireen 67 Mudane waxaa Odoroska Miisaaniyada Qaran ee Sanadka 2017ka cod gacan taaga ku ansixiyay 43 Mudane, waxaana diidey 17 Mudane, halka 6 mudane ka aamuseen, waxaana sidaas Golaha Wakiiladu ku meel-mariyay Ansixinta Miisaaniyada 2017ka oo dhan Lacag ah **2,175,104,355,662 Somaliland Shilling/=** oo u dhiganta **\$362,517,393 US Dollar** oo isugu jira Dakhli iyo Kharash.

Masuuliyiintii Qaran ee Goluhu Ansixiyay:-

No	Magaca	Xilka Masuulka	Taariikhda
1.	Md. Yaasiin X. Max'ud Xiirey (Faratoon)	Wasiirka Arrimaha Gudaha	19/11/2016
2.	Md. Farxan Adam Haybe	Wasiirka Duulista iyo Hawada	19/11/2016
3.	M. Yuusuf Axmed Faarax (Aflahaar)	Wasiir ku-xigeenka Cadaalada	19/11/2016
4.	Md. Sharmarke Muxumed Geele	Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha	19/11/2016
5.	Md. Shuceyb Maxamed Muuse	Wasiirka Warshadaha	10/12/2016
6.	Md. Guuleed Maxamed Jirde	Wasiir ku-xigeenka Duulista iyo Hawada	17/12/2016
7.	Md. Maxamed Mixile Boqore	Wasiiru-dawlaha Arrimaha Dibada	17/12/2016
8.	Md. C/waaxid C/raxman C/qaadir	Wasiiru-dawlaha Wasaarada Beeraha	17/12/2016
9.	Md. Maxamed Axmed Aadan	Wasiiru-dawlaha Wasaarada Warfaafinta	17/12/2016
10.	Md. Cali Axmed Maxamed (Dhegoole)	Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Maaliyada	17/12/2016

Xeerarka Golaha Horyaal iyo kuwa Gudiyadu Gacanta ku hayaan:-

A. Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan:-

No.	Magaca Xeerka	Gudidda gacanta ku heysa
1.	Xeerka Shirkadaha	Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga
2.	Xeerka Xawaaladaha	Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga
3.	Xeerka Caymiska	Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga
4.	Xeerka Deegaanka (National Environmental Bill)	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
5.	Xeerka Shidaalka	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
6.	Xeerka Macdanta Somaliland	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
7.	Xeerka Maamulka Qashinka (Waste Management Bill)	Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga
8.	Xeerka Ciyaaraha	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
9.	Xeerka Saxaafada	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
10.	Xeerka ka hortaga Argagaxisada	Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada
11.	Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada	Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada
12.	Xeerka Caasimada	Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada
13.	Xeerka Hay'adda Wadooyinka	Gudidda hawlaha Guud iyo Gaadiidka
14.	Xeerka Gudidda Qandaraasyada	Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida
15.	Xeerka Mideynta Cashuuraha	Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga
16.	Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose	Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta
17.	Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency	Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsiga
18.	Waxa ka badalka iyo kaabista Xeerka Ciqaabta Guud	Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka
19.	Xeerka Dakhliga Shidaalka	Gudidda Kheyraadka iyo Deegaanka
20.	Xeerka Sahninta Shidaalka	Gudidda Kheyraadka iyo Deegaanka

B. Xeerarka Golaweynaha Horyaal:-

21.	Xeerka Waxbarashada	Akhriskii labad
22.	Xeerka ka-hortaga Kufsigu iyo Tacadiyada Haweenka	Akhriskii labad
23.	Xeerka Hawlaha Ganacsiga Baananka	Akhriskii labaad
24.	Xeerka Maydhista Lacagta	Akhriski labaad
25.	Xeerka Booliiska	(Madaxtoyada ka soo noqdey)
26.	Xeerka Gudidda Dib U-habeynta Shuruucda	(Madaxtoyada ka soo noqdey)
27.	Xeerka Xabsiyada	(Madaxtoyada ka soo noqdey)
28.	Xeerka Hay'adda Duulista Hawada	(Madaxtoyada ka soo noqdey)

Waxqabadka Guddiyada Golaha Wakiilada.

Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Gudidda Joogtada iyo Anshaxa oo Golaha wakhtiga fasaxa ka wakiil ahi waxay intii lagu jirey fasixii ka dambeeyay kal-fadhigii 32^{aad} ay kulamo la yeeshen Masuuliyiin kala duwan oo ah Wasiiro iyo Masuuliyiin Hay'addo Dawladeed, waxaana ka mid ahaa Masuuliyiinta ay Gudiddu la kulantay:-

- Wasiirka Wasaarada Warshadaha
- Wasiirka Wasaarada Duulista Hawada iyo Gaadiidka Cirka
- Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha iyo
- Gudidda Abaaraha Heer Qaran

Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsigu iyagoo gudanaya Waajibaadkooda Xeer-hoosaadka Golaha waxay intii lagu jirey Kal-fadhigii 32aad Golaha uga soo Warbixiyeen Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2017ka oo Wasaarada Maaliyadu Golaha horkeentay isla markaana Gudidda Dhaqaalaha lagu wareejiyay si uga soo gutaan waajibaadkooda oo ah inay Golaha Warbixin uga soo diyaariyaan Miisaaniyada ka dib markay soo baadhaan Qorshaha Miisaaniyada ee Dakhli iyo Kharash, isla markaana wixii su'aalo ama faah-faahin uga baahdaan Wasaarada Maaliyada u yeedhaan oo wax ka waydiiyaan.

Sidaa darted, Gudiddu ka dib markii ay kulamo la yeelatay cidkasta oo ay khusesay Miisaaniyadu iyo cidii tabasha ka qabtey kana soo xogwareysteen Masuuliyiinta Wasaarada Maaliyada, sidoo kale ay kormeero kala duwan ku tageen Goobaha dakhliga dalka, Waxay Gudidda Dhaqaaluhu Warbixin ka siiyeen Golaha Miisaaniyadaas **31/12/2016** Warbixintaas oo uu Golaha ka horjeediyay Gudoomiyaha Gudiddaas Md. Cumar Axmed Saleeban (Sanweyne).

Sidoo kale Gudiddu waxay Golaha uga soo talo-bixisay Ansixinta Masuuliyiinta Qaran ee kala ah:-

- Wasiirka Duulista Hawada Md. Farxaan Axmed Heybe
- Wasiirka Warshadaha Md. Shuceyb Maxamed Muuse
- Wasiir Ku-xigeenka Maaliyada Md. Cali Axmed Maxamed iyo
- Wasiir Ku-xigeenka W. Duulista Md. Guuleed Maxamed Jirde

Guddida Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga ah:-

Guddiga Deegaanka iyo khayraadka Dabiiciga iyaga oo gudanaya waajibaadkooda shaqo waxay socdaal qaatey mudo 8 maalmood ah ku tageen **25 February ilaa 05 March 2017** Gobolada Awdal, Gabilay iyo Hawd, iyagoo u kuurgalaya xaalada guud ee abaaraha gaar ahaan deegaanada ay ku soo guureen dadkii abaarta xuni ku dhacday ee kasoo guuray beriga somalinad.

Ujeedada guud ee safarku wuxuu ahaa u kuurgalida iyo xog-ogaal u noqoshada xaalada guud ee abaaraha gobolada galbeed ee somaliland dadkii soo guuray iyo waliba xaalada dadkii lagu soo guuray, waxa kale oo ujeedada safarku daarnayd sidii Guddida Deegaanka iyo khayraadku uu baaq ku aadan dhibta abaarta iyo dadku waxay u baahan yihiin ay ugu gudbin lahaayeen Goleweynaha, si baaq looga soo saaro dhibaataada abaarta iyo waliba dadkaasi waxay u baahan yihiin si aan looga caajisin caawinta iyo kaalmaynta dadka abaartu haleeshay.



Intii Guddidu safarka ku jirtay waxay kulamo iyo kormeero ku soo mareen xarumo iyo deegaan ka tirsan Goboladaas, iyagoo intii ay ku sugnaayeen Gobolka Awdal Magaalo Madaxdiisa ay kulamo la yeeshen Badhasaabka Awdal iyo Guddida Abaaraha ee Gobolkaas, sidoo kale waxay Guddidu booqataey Deegaanada Qol-ujeed iyo Degmada Dilla, halka Gobolka Gabiley ay tageen Magaalada Gabiley iyo Degmada Wajaale iyo Tuulooyinka Waxaro Waaris iyo Baliga Cas oo ka tirsan Degmadaas Wajaale.

Iyagoo Gudiddu intii ay safarka ku jireen u kuurgaleen Xaalaada Abaareeda ee Deegaanadaas iyo intay dhibaataadu le'egtahey, waxay Gudiddu Warbixin ay ka diyaarisey ku soo jeedisey tallooyinkan soo socda:-

1. waa in Dawladu ku dhawaaqdaa xaalad dag-dag ah islamarkaana Miisaaniyada Qaranka bisha hadhay 30% ay ugu talo gashaa taakulaynta iyo gurmada abaaraha
2. waa in Dawladu gaadiidka iyo shidaalkaba ugu deeqdaa dadka abaaraysan
3. waa in dib loogu noqdaa qaab-dhismeedka Guddida abaaraha oo la helaa Guddi ka kooban bariga iyo galbeedkaba, lana helaa kormeer iyo la xisaabtan.

Intii lagu jirey Kal-fadhigii 32^{aad} waxay Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiicgu Golaha uga soo talo-bixisay Ansixinta:-

- Wasiiru Dawlaha Beeraha Md. C/waaxid C/raxman C/qaadir

Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

Intii lagu jirey Kal-fadhigii 32^{aad} waxay Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiicgu Golaha uga soo talo-bixisay Ansixinta:-

- Wasiiru Dawlaha Warfaafinta Md. Maxamed Axmed Aadam
- Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Md. Sharmaarke Muxumed Geele

Gudidda Arrimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah

Intii lagu jirey Kal-fadhigii 32^{aad} waxay Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiicgu Golaha uga soo talo-bixisay Ansixinta:-

- Wasiiru Dawlaha W. Arrimaha Dibada Md. Maxamed Mixile Boqore

Gudoomiye Baashe oo la kulmay Cali Khaliif Galeydh:-

Wafti uu hogaaminayay Gudoomiye ku-xigeenka 1aad ee Golaha Wakiilada Md. Baashe Maxamed Faarax isla markaana ay ku weheliyaan Xildhibaanada kala ah Md. Siciid Maxamed Cilmi iyo Md. Maxamed Axmed Maxamud (Dhakool) ayaa la kulmay Gudoomiyaha Khaatumo Md. Cali Khaliif Galeydh.

Kulankaas waxay labada dhinac kaga wada hadleen saddex arrimood oo tan kowaad tahey halkuu matayo wada-hadalkii Somaliland iyo Khaatumo u socday,

Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 32^{aad}

labada arrimood oo kale waxay ahaayeen arrimaha Deegaanka Gobolka, isagoo Cali Khaliif Galeedh sheegay in arrimihii Somaliland iyo khaatumo u socday ay meel wanaagsan marayaan hadii ay tahey dhinac Nabadgalyada iyo Siyaasada, Sidaa darteed waftigaas Gudoomiyuhu hogaaminayay waxayna Golaha ka codsadeen inuu taageero arrintaas.

Wufuudihii Golaha Yimi:-

Taariikhdu markay aheyd **24 December 2016kii** waxaa Golaha yimid Wafti ka socda dalka Sweden oo uu ka mid ahaa xildhibaan Baarlamaanka Dalkaas ka tirsan iyo Gudida ictiraaf raadinta Somaliland ee dalka Sweden, iyadoo Waftigaas uu Goluhu Warbixin kaga dhageystay Fadhiigii 15^{aad} ee Kal-fadhigaas 32^{aad}, Waxaana Warbixintaas Golaha ka hor akhriyay Xildhibaan ka tirsan Baarlamaanka dalkaas isagoo sheegay in qadiyada Somaliland oo gudidda ictiraaf raadinta dalka Sweden oo safarkan ku wehelinaysay uu kala shaqaynayay kor u qaadista iyo ictiraaf u raadinta Somaliland.



Wuxuu sheegay in horumarka iyo waxay qabsadeen Dadka iyo Dawlada Somaliland aaney aheyn wax la dafiri karo, isagoo sheegay inay Somaliland ka hirgashey Dimuqraadiyad aan badanka dalaka mandaqada ay ku taalo aaney gaadhin ama aaney sameyn, wuxuu sheegay inuu aad ugu faraxsan yahey inuu soo hor istaago Baarlamaanka Somaliland oo uu manta

Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda | Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 32^{aad}

hor-joogo kana hor khudbadeeyo, wuxuu dadka iyo Dawlada Somaliland gaar ahaan Golaha Wakiilada ugu mahadnaqay soo dhoweynta, wuxuuna balan qaadey inuu ka sii shaqeyn doono arrinta qadiyada ictiraafka Somaliland uuna horgeyn doono Baarlamaanka Dalkiisa Sweden.

Dib u-eegis lagu sameeyay Qorshihii Hiigsiga ee 2013-2016:-

Wuxuu Goluhu Sanadkii 2013kii Sameystay Hiigsi Qorshe uu hiigsanayo saddex sano oo ka bilaabmayay 2013kii ilaa 2016kii, qorshahaas Hiigsiga wuxuu Goluhu ugu talo-galey inuu horumar ka sameeyo qeybaha kala duwan ee Golaha mudadaas, waxaana ansixiyay Qorshahaas Golaha.

Qorshahaas Hiigsiga dhamaadey sanadkii ina soo dhaafey, waxaa Golaha u qorsheysan inuu sameeyo qorshe shan sano (five years Strategic Plan), hadaba, Waxaa ka hor intaan la galin dejinta iyo diyaarinta Qorshahaas shanta sano ee soo socda, waxaa qiimeyn iyo dib u eegis lagu sameeyay strategic plankii hore ee saddex sano ahaa oo dhamaadey, waxaana kulan laba maalmaado qaatey lagu qabtay Hotel Maansoor taariikhdu markay ahedy 1-2 March 2017 waxaana kulankaas isugu yimi Xildhibaanada Golaha ka Tirsan, Xoghayaha Guud, Agaasimayaasha Waaxyaha Golaha iyo La-taliyayaasha, waxaana dib u eegis iyo qiimeyn lagu sameeyay waxyaabihii ka qabsoomey qorshahaas hore iyo wixii aan la qaban ee ku qorsheysnaa.



Sidoo kale, waxaa Magaalo Madaxda Gobolka Tog-dheer lagu qabtey kulan kaas oo kale ah oo hormood ka ahaayeen La-taliyayaasha iyo Golaha iyo dhowr Agaasime

Waaxeed, waxayna kulan la yeesheen isuduwayaasha Wasaaradaha/Hay'addaha Dawlada ee Gobolkaas iyo Xildhibaanada Golayaasha Deegaanka ka tirsan.



Ugu dambeyntiina si loo soo gabo-gabeeyo qiimeyntaas iyo dib u-eegista lagu sameynayay qorshahaas hiigsiga saddexdii sano ee ina soo dhaafey oo dhamaadey, waxaa kulan kama dambeysa ah oo lagu soo ururinayay waxyaabihii ka soo baxay labadii kulan ee hore lagu qabte Hoolka Shirarka ee Golaha kaas oo goob joog ka ahaayeen xubnihii labadii kulan ee hore ka soo qeyb-qaatey waxaana halkaa ku soo bandhigay natiijadii ka soo baxday ee wixii ka qabsoomey iyo wixii aan la gaadhin ee ku jirey strategic plankii hore halkaa ku soo bandhigay Gudida Farsamo ee hormoodka ka aheyd hawshaas oo ka mid ahaa **Mubaarik Faarax Warsame** La-taliyaha Siyaasada, **Siciid Faarax Xaashi** La-taliyaha Mashaariicda, **C/naasir Cismaan Maxamuud** Agaasimaha Waaxda Qorsheynta iyo **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada Md. C/risaq Siciid Ayaanle**, waxaana halkaa ka soo baxay in 75% boqolkiiba la gaadhey waxyaabihii ku qorsheysnaa Hiigsiga Qorshahaas 2013-2016kii ee dhamaadey.

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL.

[Waaxda Hadal Qoraalka iyo Gudiyadda](#) | [Warbixinta Shir-gudoonka ee Kal-fadhigii 32^{aad}](#)